# Soo Laabashada Soomaalida Qurbaha

## Aragtida iyo Saameynta

### Qodobbada ugu Muhiimsan

- Soo laabashada Soomaalida qurbaha waa waji cusub oo ay dalkooda ku wajahayaan. Taageerada dhaqaale (xawaaladda) ayaa ah aaladda ugu muhiimsan ee qurba-joogtu ku taageerto dadkooda. Balse soo noqoshada qurba-joogta dacallada dunida ku baahsan waxay kaloo kaalin muhiim ah ka cayaaraysaa dib-u-dhiska dalka iyo waliba horumarkiisa.
- Soo laabashadu waa mid ku baahaysa qurba-joogta. Taasi waxay qurba-joog badan ku dhiirri galineysaa inay ka fekeraan inay waaya-aragnimada iyo hantida ay ka kaydsadeen qurbaha ay la wadaagaan dadlka ay asal ahaan kasoo jeedaan. Balse, dib u soo laabashadu waxay suurtagal u tahay oo kaliya kuwa qaatay dhalashada dalalka ay martida ku yihiin, kuwa uruursaday dhaqaale xoog leh iyo kuwa xiriir wanaagsan ku leh Soomaaliya.
- Qurba-joogta Soomaaliya kusoo laabtay waa kuwa aad uga. muuqda dalka. Soo laabashadoodu waxay dhalisay dood ku saabsan qurba-joogta iyo sida uu dalku uga faa'iideysan karo 'hantida' ay lasoo laabteen.
- Qurba-joogta soo laabatay waxay doodo la galaan Soomaalida an dalka ka bixin muddadii colaadaha. Somaalida aan dalka ka bixin "Guri-joog" iyaguna waxay qiraan muhimadda qurba-joogta soo laabaneysa iyo xiriirkooda, iyagoo xiiseynaya inay yareeyaan farqiga u dhaxeeya, isla markaana doonaya inay dhidibbada u aasaan in dalkooda ay dib u wada dhistaan.
- Waxaa jira xiisad u dhaxeysa qurba-joogta iyo 'guri-joogta' taas oo salka ku haysa aragtida dadka dalka ku haray ee ku beegan qurba-joogta, oo ah inay yihiin kuwa isla-weyn, isla markaana hela fursado shaqo oo ka badan kuwa ay 'guri-joogtu' helaan, iyo in labada bulsho ay kala soocan yihiin. Xiisaddan way sii xoogeysan kartaa haddii aysan dhinacyada oo dhami si qumaati ah u abbaarin.
- Inta badan, soo laabashada qurba-joogtu waa mid aan rasmi aheyn, una badan laba canleyn, taas oo sii xoojineysa xiisadda labada dhinac. Maamullada ka jira dhulka Soomaalida waxaa la gudboon inay wanaajiyaan xaaladda amni ee dalka, isla markaana wax ka qabtaan adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada, si qurba-joogtu si rasmi ah ugu soo laabato.

### Horudhac

Lama hayo xog ku saabsan baaxadda soo laabashada qurba-joogta. Si kastaba ha ahaatee, waxaa aad loo rumeysan yahay in qurba-joogta Soomaalidu ay dalkooda si muuqata ugu soo laabanayeen sanadihii ugu dambeeyey, iyadoo taas lagu dhisayo sida ay uga dhex muuqdaan bulshada. Kororkan ayaa ah billowga waji cusub oo qurba-joogtu ay dalkooda kaalin uga cayaarayaan. Lacagta ay qurba-joogtu soo diraan ayaa taageero biyo kama dhibcaan ah u fidisa qoysaska Soomaaliyeed. Doodaha ku saabsan kaalinta ay qurba-joogtu ku yeelan karaan dibu dhiska dalkooda ayaa sii kordhaya.

Soo laabashada sii kordheysa ee qurba-joogta Soomaalida waxaa astaan u ah sameynta waaxyo arrimaha qurba-joogta ka shaqeeya. Bishii October ee sanadkii 2013-ka, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Dowladda Federaalka ayaa yagleeshay Xafiiska Arrimaha Qurba-joogta. Wareegto madaxweyne oo kasoo baxday madaxtooyada Somaliland sanadkii 2010-ka ayaa sidoo kale lagu sameeyey Wakaaladda Qurba-Joogta Somaliland oo hoos timaadda Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

Qoraalkan wuxuu ku saleysan yahay daraasad hadafkeedu ahaa sahminta sababaha keenay in Soomaali badani ay qurbaha kasoo laabtaan, gaar ahaan dalalka Mareykanka iyo Norway, noocyada soo laabashada iyo kaalinta ay qurba-joogtu ku

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda** waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

leeyihiin dibu dhiska iyo horumarinta dalkooda.[1] Daraasaddu waxay si qoto-dheer u eegtay sida ay 'guri-joogtu' u arkaan kaalinta qurbaha. Sidoo kale, waxay daraasaddu eegtay sida go'aanka ku laabashada Soomaaliya uu u saameeyey waaya-aragnimada ay qurba-joogtu kasoo heleen dalalkii ay martida ku ahaayeen.

Xogta iyo talooyinka ku qoran qoraalkan waxay ku saleysan yihiin 29 wareysi iyo saddex wareysi-kooxeed (focus group) oo lala yeeshay qurba-joogta iyo guri-joogta. Wareysiyadaas waxay ka dhaceen Muqdisho, Garowe iyo Hargeysa. 23 Wareysi oo kalena waxaa laga qaaday Soomaalida Oslo (Norway), halka 21 kalena laga qaaday Soomaalida Minneapolis. Sababta magaalooyinkan loo xushay ayaa ah iyadoo ay joogaan Soomaali badan, iyo iyadoo ay xarumo u yihiin labada hey'adood ee daraasaddan aan iska kaashannay oo kala ah: Machadka Humphrey ee Jaamacadda Minnesota, iyo Machadka Cilmi-Baarista Nabadda ee Oslo (PRIO).

Soomaaliya gudaheeda, ereyga 'qurba-joog' wuxuu kiciyaa dood iyo muran. Soomaalida aan dalka ka dhoofin waxay qurba-joog u aqoonsan yihiin Soomaalida heysata dhalashada dalalka Reer Galbeedka ah oo kaliya. Masuuliyiinta Soomaalida ayaa imminka dhiirri-galinaya qeexitaan intaas ka guda ballaaran, kaas oo ay ku jiraan Soomaalida ku nool meelaha aan Galbedka aheyn.[2] Qurba-joogta iyo guri-joogtu waxay isku raacsan yihiin in ereygu uu yahay mid aan fadhin. Kuwa qurbaha kasoo laabtay ayaa isku arka inay 'guri-joog' noqdeen marka ay dhowr bilood joogaan.

## Sababaha Dhaliya Soo Laabashada

**"Waxaa na saaran masuuliyad inaan soo laabanno, dalkeenna hagaajinno, soona celinno wixii aan dibadda kusoo barannay."**

**"Iskama soo laaban kartid.... Waa inaad muujin kartaa wuxuu aad dibadda ka qaban jirtay....waxaan dareensanahay inaan isbeddelka Soomaaliya ka qayb qaadanayey."**

Qurba-joogta soo laabatay waxay mar walba hoosta xarriiqaan dareenka waajib iyo midka masuuliyadeed oo ay dalkooda u qabaan, si ay ugu soo celiyaan aqoontii iyo khibraddii ay dibadda kasoo qaateen. Balse, inkastoo uu dareenkaas qurba-joogta ku xooggan yahay, haddana haddii aysan jirin fursad soo celisa—sida shaqo, fursad ganacsi ama jago siyaasadeed—soo laabashadu suurtagal ma ahan.

Waxyaabaha ugu badan ee fududeeya soo laabashada waxaa kamid ah dhalasho Reer Galbeed (baasaboor). Dhalashadu waxay suurtagalisaa socdaalka. Inta badan, qurba-joogta reerkooda ayaa dalkii ay ka yimaaddeen u jooga, kuwaas oo aan awoodin, ama aan dooneyn inay dalka dib ugu soo laabtaan xilligan. Baasaboorku wuxuu sahlaa in, haddii dhibaato xoog leh ay dhacdo, ay dalka si dhakhso ah uga bixi karaan.

Way dhici kartaa in go'aanka ku laabashada Soomaaliya uu horseedu doonitaan dhab ah oo ah in dibu dhiska dalka laga qayb qaato, balse inta badan waxaa ku laabashada Soomaaliya suurtagaliya fursado jira. Kuwa soo laabanaya waxay isku dheelli tiraan rabitaanka ka qayb-qaadashada dibu dhiska dalka iyo yididiilo shakhsiyadeed. Qurba-joog badan oo aqoon leh ayay ku adag tahay inay shaqo wanaagsan ka helaan dalka ay martida ku yihiin, waxayna qirsan yihiin in khibradda ay dibadda kasoo qaateen aad looga baahan yahay dalkii hooyo.

Dhallinyarada qurbaha kasoo laabaneysa ayaa sidoo kale isku dheelli tira hammigooda shakhsiga ah iyo rabitaankooda ku beegan inay kaalin ka geystaan dibu dhiska dalkooda, inkastoo ay marar badan doonayaan inay dib u jalleecaan hidohood iyo dhaqankooda. Qaar kale ayaa Soomaaliya u yimaadda inay ka kororsadaan khibrad ah dib ugula noqdaan dalalka ay dhalashadooda heystaan, si ay shaqo uga raadsadaan hey'adaha horumarinta caalamiga ah.

Si kastaba ha ahaatee, qurba-joogta soo laabaneysa ma mooga caqabadaha waaweyn ee la xiriira ka shaqeynta Soomaaliya, oo ay kamid tahay walaac amni iyo kartida liidata ee ay dowladuhu u leeyihiin inay sharciga iyo kala dambeynta sugaan. Bilihii ugu dambeeyey, kooxda al-Shabaab ayaa u hanjabtay qurba-joogta soo laabaneysa. Caga-jugleyntaas waxaaba dhici karta inay dhiirri galiso kuwa soo laabanaya inay laba jibbaaraan dadaalkooda, balse waxaan shaki ku jirin in qaar badanna ay uga hakanayaan inay soo laabtaan. Sidaas darteed, soo noqoshada qurba-joogtu waa mid aan raasmi aheyn, oo u dhaxeysa Soomaaliya iyo dalkii ay dhalashada ka heysteen.

Dalalka Galbeedka ayaa iyaguna inta badan aan si wanaagsan u fahmin laabashada qurba-joogta. Waxay rumeysan yihiin in marka ay xaaladdu wanaagsanaato ay dad badani si rasmi ah u laaban doonaan. Intaas waxaa dheer in dalalka Galbeedku ay walaac ka qabaan in dhallinyaradu aragtiyo xagjir ah soo min-guuriyaan, taasoo leh khatar amni. Sidaas darteed ayay dowladda Mareykanku siyaasadeeda ka hortagga argagixisada waxaa kamid ah in lala shaqeeyo Soomaalida qurbaha.[3] Increasingly there is an awareness that the diaspora can play an important role in counter-radicalization both in Somalia and within host countries.

Waxaa soo if-baxeysa in qurba-joogtu ay kaalin muhiim ah ka cayaari karaan ka hortagga faafinta aragtiyada xagjirka ah, Soomaaliya gudaheeda iyo waliba dalalka martida loo yahay.

Hey'ado kala duwan, dowlado ajnabi ah iyo Qaramada Midoobay ayaa haatan wada mashaariic lagu taageerayo in qurba-joogtu ay maskaxdooda iyo muruqooda ugu faa'iideeyaan dibu dhiska kartida iyo tayada hey'adaha Soomaalida. Mashaariicdan ayaa ah kuwa waxtar leh oo dhiirri galiya soo laabashaa qurba-joog leh aqoon iyo karti kuwaas oo dalkooda u faa'iideeya, iyagoo waaya-aragnimo wax ku ool ah sameysanaya.

Tusaale ahaan, mashruuc ay iska kaashanayaan Hey'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) iyo Laanta Qaramada Midoobay u Qaabilsan Horumarinta (UNDP) oo la yiraahdo QUESTS-MIDA ayaa loo sameeyey in qurba-joogta xirfadaha leh ay dalkooda dib ugu soo laabtaanna, lana shaqeeyaan hey'adaha dowladaha jira.[4] Dowladaha maal-galinaya mashruucan waxaa kamid ah: Mareykanka, Japan, Netherlands, Findland, iyo Sweden.

Sidoo kale, heya'dda Sweden u qaabilsan horumarinta caalamiga ah ee SIDA ayaa istiraatiijiyaddeeda Soomaaliya ee sanadaha 2013-2017 waxay ku caddeysay mowqifkeeda ku beegan kaalinta qurba-joogta ee horumarintda dalkooda: "Diiradda waa in la saaraa sidoo si degdeg ah loogu dhiirri galin lahaa in qurba-joogta Soomaalidu ay dalkooda dibu dhiskiisa kaalin ka ciyaaraan, iyadoo xoogga la saarayo hannaan qiimo ahaan macquul ah, natiijo la taaban karana laga gaari karo."[5]

## Kaalinta & itaalka Qurba-joogta

**"Waxaan ku jirnaa wajiga hore ee saameynta qurba-joogta... dadka soo laabanaya ee doonaya inay dalkooda tayadiisa sare u qaadaan. Dhinacyo badan oo nolosha ayaan kaalin ku leenahay, wakhti ayay qaadaneysaa in dadaalkeennu horumaro."**

**"Ma jiro halbeeg la saari karo kaalinta aan ka qaatay. Waxaan rumeysanahay inaan wax ku biirinayo nidaamka muddada fog ee dalka. Waxaan dareemaa inaan qayb ka ahay isbeddel dhinacyo badan leh oo dalka saameynaya."**

Iyagoo ku hubeysan aqoon, khibrad iyo dhaqaale ay kala yimaaddeen dalalka ay dhalashada ka haystaan ayay qurba-joogta Soomaalidu dhinacyo badan ka dhex muuqdaan. Kaalintoodu ma mahan mid habeysan oo si cad loo qeexi karo. Ujeeddooyinka daraasaddan kuma jirin in si cilmiyeysan loo qiyaaso kaalinta qurba-joogta. Dhinacyada kala duwan ee Soomaalida—dowladaha, qurba-joogta iyo guri-joogta—ayaa siyaabo kala duwan u kala hormarsiiya baahiyahooda, kaddibna isku daya inay sida ugu habboon wax uga qabtaan.

Inta badan, qurba-joogta soo laabaneysa ee doonaysa inay kaalin ku yeeshaan dibu dhiska iyo horumaritna dalka waxay ka howl-galaan dowladaha iyo hey'adaha aan macaash doonka aheyn (NGOs). Dhowr iyo labaatan sano oo qaran-jab ah kaddib, kartida iyo tayada hey'adaha dowliga ah ayaa ah mid aad u liidata dhulka Soomaalida oo dhan. Maadaama ay maqan tahay kaalintii dowladda ee adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada, hey'adaha aan macaash doonka aheyn iyo bulshada rayidk ah ayaa si weyn uga dhex muuqda dhankaas. Qurba-joog badan ayaan hoosta ka xarriiqa ahamiyadda ay leedahay inay dalka kusoo celiyaan dhaqammo cusub oo xagga shaqada ah, oo ay ugu horreyso akhlaaqda shaqada iyo masuuliyadda bulshada.

Waxaa loo arkaa in dibu dhiska hey'adaha dowliga ah uu yahay mid kamid ah waajibaadka ugu muhiimsan ee gacan laga geysan karo. Qurbo-joog badan ayaa usoo laabta inay nidaamka siyaasadeed ka qayb qaataan. Soomaali badan, gaar ahaan ragga waaweyn, ayay ku adag tahay inay kaalin ku yeeshaan siyaasadda dalalka ay dhalashadooda heystana. Si gaar ah raggaas waaweyn, kusoo laabashada gayiga Soomaaliyeed waxay siineysaa fursad ay siyaasadda dib ugu soo laabtaan, ama heer gobol ama heer qaran. Qaar badan ayaa usoo laabta si ay usoo min-guuriyaan dhaqan-siyaasadeed caalami ah oo ay kasoo barteen dalalka ay muddada ku noolaayeen, gaar ahaan dhinacyada isla xisaabtanka iyo hufnaanta (shafaafiyada).

Saaxadda siyaasadeed ee Soomaaliya waxaa ka seed-caleeya rag da'a ah. Dumarka iyo dhallinyarada ayay ku adag tahay inay galaan siyaasadda heerarkeeda ugu sarreeya, sidaas darteed ayaysan ugu badneyn inay siyaasad darteed ugu soo laabtaan gayiga Soomaaliyeed. Balse, dumarka iyo dhallinyarada qurbaha kasoo laabanaya ayaa inta badan loo qaataa shaqaalaha rayidka ah ama la taliyayaal masuuliyiinta sare ee dowladdda. Qaar kale ayaa hela shaqooyin kumeel gaar ah oo cilmi-baaris iyo talo-bixin u badan.

Qurbo-joog badan ayaa ka shaqeeya NGO-yada sababtoo ah waxay rumeysan yihiin in horumarka dalka ay Soomaalidu hormuud ka noqdan. Qaar badan ayaa u arka shaqooyinka noocan ah kuwa ay ku diirsan karaan maadaama ay wax u qabanayaan dadka liita.

Inkastoo ay qurb-joogtu aad u qiimeeyaan aqoonta iyo khibradda ay lasoo laabanayaan, haddana qaar kale ayaa sidoo kale u qiimeeya inay lasoo noqdeen sifooyin ay kasoo barteen dalalkii ay muddo joogeen, gaar ahaan sifooyinka howl-karnimada iyo is-xilqaanka bulsho.

Qaar kamid ah kuwa soo laabanaya, gaar ahaan ragga waaweyn, ayaa kaalin xoog leh ka geysanaya xagga ganacsiga, oo awalba ahaa mid firfircoon. Inkastoo raggu ku xooggan yihiin ganacsiga, haddana dumar iyo dhallinyaro badan ayaa kusoo badanaya. Amiga oo soo wanaagsanaanaya iyo galaangal ayaa u fududeeyey Soomaalida qurbaha inay ganacsi ka hirgaliyaan Soomaaliya. Hannaanka canshuuraha oo liita iyo iyadoo aysan jirin shuruuc xannibeysa ganacsiga ayaa qaar badan ku dhiirri galiya inay Soomaaliya ka ganacsadaan.

Qurba-joogta soo laabaneysa waxay si gaar ah u daneeyaan ganacsiga qaybtiisa ka qayb qaadanaya dibu dhiska dalka. Maal-gaashiga xagga beeraha, tusaale ahaan, wuxuu abuuraa shaqooyin badan isagoo yareynaya ku tiirsanaanshaha taageerada cuntada dibabadda. Masuuliyiinta Soomaalida ayaa qurba-joogta  ku dhiirri-galinaya inay maal-gashadaan qaybaha ganacsiga la rumeysan yahay inay aasaas u yihiin soo kabsashada dalka.

## Xiriirka Qurba-joogta iyo Guri-joogta

**"Waan taageersanahay in qurba-joogtu soo laabato. Intii aysan soo laaban dhaqaale ayay nagu taageeri jireen. Waa walaalaheen haba iska jiree farqiga xagga fekerka iyo luqadda ahe. Waxaan rumeysanahay inay dalkeenna u roon yihiin."**

**"Kuwa dibadda kasoo laabtay, qaarkood waxay leeyihiin tayadii iyo kartidii loo baahnaa, qaarna ma lahan. Dhammaantood ma ahan kuwa aqoon leh. Is faham darro iyo xiriir xumo ayaa jirta. Dadku waxay u baahan yihiin inay midoobaan."**

Xiriirka qurba-joogta soo laabatay iyo dadka aan dalka ka bixin waa mid dhib badan. Mowduucan oo aan si wanaagsan loo fahmin ayaa mudan in gudaha iyo dibadda-ba si wanaagsan loo fahmo. Soomaalida aan dalka ka dhoofin waxay muujiyeen inay abaal u hayaan kuwa qurbaha, kaalintii mugga laheyd ee ay dalka ka qaateen. Dhaqaalaha ay qurba-joogtu usoo diraan dalka ayaa ah mid kaalin weyn qaata. Sida ay qortay warbixin 2012-kii, qurba-joogta ayaa qiyaastii $1.6

bilyan dalka usoo dira sanad walba.

Soomaalida aan dalka ka dhoofin way garowsan yihiin kala duwanaanshaha qurba-joogta. Tusaale ahaan, way u kala soocan yihiin qurba-joogta guulo kasoo hooyay dalalkii ay ka yimaaddeen, iyo ku fashilmay inay ka faa'iideystaan fursadihii ay heleen. Sida aan kor ku xusnay, soo noqoshada qurba-joogta waxaa kaalin weyn ka ah heerka guusha uu qofku ka gaaray dalkii uu kasoo laabanayey. Sidaas oo ay tahay, waxaa jira xiisad u dhaxeysa labad dhinac, taas oo loo aaneyn karo dhowr arrimood.

Midda ugu horreysa, qurba-joog badan ma awoodaan inay xiriir joogto ah la yeeshaan dadka aan dalka ka dhoofin, arrimo xagga amniga ah dartood. Guri-joogtu waxay marar badan qurba-joogta u arkaan kuwa islaweyn. Dareenkaas waxaa sii xoojiya degganaansho la'aanta qurba-joogta taas oo loo fasirto inaaneey dalka usoo fara marnaan.

Midda labaad, qurba-joogta soo laabatay waxay door-bidaan inay kuwa iyaga lamid ka ah la sheekeystaan (qayb ahaan taas waxaa keenaya doonitaanka isku xirnaanta xagga shaqo). Marar badan waxay deggan yihiin aagag nabad ah. Sidaas darteed, kuwa soo laabtay waxay u badan yahay inay iyagu wada sheekeystaan, gaar ahaan haddii ay hal dal kasoo wada laabteen.

Midda saddexaad, guri-joogtu waxay qurba-joogta soo laabatay u arkaan inay ka fursado shaqo badan yihiin, maadaama ay shahaadooyin iyo waaya-aragnimo Galbeedka kasoo qaateen. Arrintani waxay horseedday farqi xagga mushaarka ah. Sababahan iyo kuwa kale oo ay dadka gudaha ka qabaan qurba-joogta oo xagga dhaqanka ah ayaa horseedi kara in xiisaddu ay sii ballaarato labad dhinac.

## Gunaanad

Haddii aanay colaad baahsan dib ugu soo laaban gayiga Soomaalida, soo noqoshada qurba-joogtu way sii socon doontaan. Marka la eego xasilloonida sii kordheysa ee dacallada dalka, waxaa la oddorosi karaa in soo laabashada qurba-joogtu ay korodho. Balse, kaalinta ay qurba-joogtu ka qaadato dibu-dhiska dalka wuxuu ku xirnaan doonaan sida ay ugu milmaan guri-joogta. Tani waxay u baahnaan doontaa in qurba-joogtu aysan iska soocin guri-joogta, si qumaati ahna ula shaqeeyaan. Sidoo kale, waxaa lagama maarmaan ah in guri-joogtu ay soo dhaweeyaan qurba-joogta soo laabaneysa ee dalkooda ka irdhoobay xilligii colaadda.

Qoraalkan wuxuu caddeeyey ahamiyadda ay leedahay in si qumaati ah looga doodo arrinta la xiriirta soo laabashada qurba-joogta. Dowladda Federaalka—oo ay ku badan yihiin qurba-joogta—ay garowsatay kaalinta ay qurba-joogtu u leeyihiin dibu dhiska iyo horumarinta dalka. Sidaas oo ay tahay, haddana ahamiyaddii loo baahnaa lama siin isdhex-galka qurba-joogta iyo guri-joogta. Haddii aan arrintaas wax laga qabanna waxaa sii xumaan kara xiriirka labada dhinac.

## Talooyin Tixgalin Mudan

- Waxaa jira hey'ado dowladeed oo Muqdisho, Garowe iyo Hargeysa ka howl-gala oo u heellan inay la shaqeeyaan qurba-joogta soo laabaneysa. Waxaa habboo in la mideeyo dadaalladaas si aan isku shaqo wakhti iyo kharash loo wada galin.
- Dowladda Federaalka waxaa la gudboon inay maamul-goboleedyada kala shaqeyso dhismaha hannaan lagu uruuriyo, laguna kaydiyo tirada, tayada iyo khibradaha qurba-joogta daneyneysa inay kaalin ku yeeshaan dibu-dhiska iyo horumarinta dalka.
- Hey'adaha dowladda waxaa la gudboon inay meel-mariyaan olole wacyi-galin ah oo ay ku xoojinayaan xiriirka qurba-joogta iyo guri-joogta. Bulshada rayidka ahna waaa inay ka shaqeeyaan isku xirka labada dhinac.
- Dalalka ay qurba-joogta Soomaalidu deggan yihiin waxaa la gudboon inay si qoto-dheer u fahmaan sababaha horseedaya soo laabashada Soomaalida. Waxaa kaloo habboon inay dhiirri galiyaan soo laabashada xirfadleyda Soomaalida ah, gacanna ka geystaan mashaariic u suura-galin kara inay kaalin ka ciyaaraan horumarinta dalka, sida mashruuca QEUSTS-MIDA.

## Tixraac

[1] Ereyga "Soomaaliya" waxay daraasaddani ula jeeddaa dhammaan gayiga Jamhuuriyaddii Soomaaliya oo ay ku jiraan Somaliland (oo imminka madax bannaani baadi goobeysa) iyo Puntland oo ah dowlad-goboleed.

[2] Tusaale ahaan waxaa jira Soomaali aad u badan, saameynna leh, oo ku nool Africa, Bariga Dhexe ee Koonfur-Bari Asia.

[3] Richardson, J. (2011) "The Somali Diaspora: A Key Counterterrorism Ally." *CTC Sentinel* 4(7): 12-14.

[4] Eeg: http://www.quests-mida.org

[5] Eeg: http://www.swedenabroad.com/en-GB/Embassies/Nairobi/Development-Cooperation/Development-Cooperation-Somalia/

Qoraalkan waxaa qortay Maymuna Maxamud oo ah cilmi-baare ka tirsan Machadka Heritage. Daraasaddan waxay ku saleysan tahay iskaashi aqooned oo ay yeesheen saddex xarun cilmi-baaris oo kala ah: **Peace Research Institute Oslo (PRIO)** oo saldhiggiisu Oslo yahay, iyo **Humphrey School of Public Affairs** oo ka tirsan Jaamacadda Minnesota ee dalka Mareykanka iyo Machadka Heritage.

Akhristayaasha waxaa la ogeysiinayaa inay dibu daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanayaa ciddii dibu u daabacda inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lasoo socodsiiso.

**© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan wuxuu lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0)**